**Rep. Larry Kraft**
Centennial Office Building - 5th Floor
St. Paul, MN 55155
rep.larry.kraft@house.mn.gov
651-296-7026
www.house.mn.gov/46a

# WARBIXINTA KALFADHIGA EE 2025

Deriska Sharafta Leh,

Fariintan waxa ay idin soo gaareysaa xilli uu gobolku marayo xaalad adag.  Way adag tahay si aan horay ugu sii socono ka dib dilkii arxandarada ahaa ee loo geystay madaxdeena Melissa Hortman, iyo saygeeda Mark.  Iyada oo aan xusuusano waxa ay ka dhigan tahay in aan sii wadno hawshii ay maanka ku heysay nolosheeda oo dhan ee dadka Minnesota.  Waxaa muhimin noo ah dhamaanteen, iyada oo aan la eegin xisbiga aan ka tirsanahay, in aan diidno naceybka iyo luqadda yasitaanka ah ee keeni karta rabshadaha siyaasadeed.

Doorashii 2024, cod dhiibtayaasha Minnsota waxa ay doorteen xubno 67-67 ah ee xubnaha 134 ee aqalka. Natiijadaas waxa ay waajib ka dhigeysaa in si wadajir ah u maamulaan dimoqraadiga iyo jamhuuriga.

nasiib daro, kalfadhiga 2025 si wanaagsan kuma bilaaban.  Jamhuuriigu way ka dhaqaaqeen gorgortanka awood qeybsiga iyaga oo isku dayey in ay maquuniyaaan doorashada.  Aniga iyo saaxiibaday waanu hor istaagnay si loo ilaaliyo dimoqraadiyadda iyo golaha. Maxkamadda sare ee Minnesota ayaa xukuntay in isku dayga awood boobka ee jamhuuriga ay tahay mid sharci daro ah.

Marka laga tago bilowga carqaladda ku dhisan, waxa aan ku faraxsanahay in aan hawl wanaagsan qabanay oo aan ogolaanay miisaaniyad isku dheelitiran. Waxa aanu si wadajir ah u soo saarnay sharciyo la xiriira DWI, adeegga cudurada dhimirka, iyo helitaanka gaadiidka dadweynaha.  Iyada oo Dimuqraadiyiintu ay difaaceen wixii horumar ah ee lagu talaabsaday 2023kii; fasaxa qoyska iyo qofka inuusan; cuntada dugsiyada ee ardayda, ka hortagga rabshadaha hubeysan, tamar nadiif ah, iyo kuwo dheeraad ah.

Waxaa sharf ii ah in aan matalo bulshadeena aniga oo bilaabay in aan u diyaar garoobo kalfadhiga 2026.

Mahadsanid,

*Wakiilka Gobolka Larry Kraft*
*Gudoomiye-wadaag, Gudiga Aqalka ee Talaabooyinka Cimilada*
*Gudoomiye ku xigeenka, Gudiga Tamarta*
*Gacan Yaraha Hogaamiyaha, Gudiga DFL ee Aqalka*

Larry Kraft

**Halkan iska diiwaan geli si aad u hesho xogta ugu dambeysa ee Larry ee Maamulka Gobolka.**





# Rep. Larry Kraft

## WARBIXINTA KALFADHIGA EE 2025

# Qoraalada aan ka shaqeynayo 2025 si ay sharci u noqdaan.

### Xoojinta sharciyada DWI waa in naf lagu badbaadiyo

Ka dib dhacdadii naxdinta laheyd ee ka dhacday jardiinada Tavern ee sanadkii la soo dhaafay, waxa aan muhimadda koowaad siiyey xoojinta sharciyada gobolka ee DWI, gaar ahaan dadka ku soo noqnoqda dambigan, iyada wadaha gaariga shan jeer oo hore lagu helay dambiga. Qoraalada (biilasha) aan ka shaqeynayo:

- Kordhinta mudada ay isticmaalayaan qalabka khamriga lagu baaro ee gaariga lagu xiro dadka dambiga ku soo noqnoqda,
- Kordhinta mudada dib loo eegayo ee dadka horay dambiga u galay lagana dhigo 10 ilaa 20 sano.
- In meesha laga saaro caqabadaha hor taagan in dadka loogu xiro gaariga qalabka lagu hubiyo cabista khamriga.

### Fududeynta Gargaarka isticmaalka gaadiidka Dadweynaha

Taxadiga ugu weyn ee Barnaamijka Yareynta Qiimaha Gaadiidka Dadweynaha (TAP) waa wacyi gelinta. Qoraalada (biilasha) aan ka shaqeynayo:

- Isku xirka codsiga barnaamijka TAP iyo bogga internetka ee dadku ka codsadaan gargaarka cuntada iyo guryaha.

### Taageerada Qoysaska xilliga Gurmadka Cudurada Dhimirka

Waxa aan la shaqeynayaa NAMI Minnesota si loo badbaadiyo qoysaska xilliga gurmadka cudurada dhimirka Qoraalada (biilasha) aan ka shaqeynayo:

- In isbitaalada laga joojiyo in ay u gudbiyaan waaxda badbaadada caruurta waalidiinta aan daaweyn ku haboon loo heli akrin caruurtooda (si la yaab leh, arrintaas waa mid dhacda mar kasta).

### Is Difaaca

Waxaanu ku taalabsanay horumar la taaban karo labaadii sano ee la soo dhaafay si ay Minnesota u noqoto goob lagu noolaado, shaqeeyo oo qoysaska lagu korsado. Xubnaha aqalka oo tiro is le'eg ah, oo Jamhuuriyiintu xoogu saarayaan dib uga noqoshada horumarka lagu talaabsaday, halkan waxaa ku xusan waxyaabaha si wanaagsan looga difaacay oo jamhuuriyiintu isku dayeen in dib looga noqdo:

- Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka oo lacag la siiyo iyo keydsashada waqtiga fasaxa iyo caafimaadka ee shaqaalaha, si aysan qofna khasab ugu noqon inuu kala doorto mushaharka iyo in ay daryeelaan naftooda iyo tan qoysaskooda.
- In la gaaro tamar nadiif ah 100% sanadka 2040.
- Cunto lacag la'aan ah ee dugsiyada si aanu ardayda waxbarashada uga qeyb qaadan calooshiisa oo maran.
- Maalgelinta waxbarashada K-12 oo lagu xiriiriyo sicir bararka si joogta ahna loo maalgeliyo waxbarashada.
- Dadaalka qaranka oo dhan oo lagu mamnuucayo isticmaalka PFAS?
- Xoriyadda Xubnaha Taranka iyo helitaanka caruurta la iska soo rido
- Safka hore kaga jira dadaalka saameynta cimilada ee sharci u dajinta wadooyinka.
- Dib u casriyeynta sharciyada tamarta sida goobaha tamarta ka dhaliya ileyska cadceedda.
- Barnaamijka Balanqaadka ee North ee waxbarashada kuliyadaha ee lacag la'aanta ah ee ardayda qoysaska dakhligoodu ka hooseeyo $80K.
- Talaabooyinka la qaadayo eeka hortagga rabshadaha qoryaha la adeegsado.
- Ilaalinta xuquuqda jinsi isku dhafka.

### Wixii iminka ka dambeeya

Xilligan oo dawladda dhexe ay ka saareyso boqolaal kun oo qof ee reer Minnesota ah Medicaid, cuntada oo loo diido dadka gaajeysan, jabinta qodobada dastuurka oo soo saaray amaro la xiriira xagga socdaalka, oo dib looga noqday sharciyada khuseeya deegaanka oo aan ka heli laheyn fursad lagu badbaadinayo saameynta ugu culus ee ka dhalan karta isbedelka cimilada, waxyaabaha aan Minnesota ka hirgelino ayaa ka sii muhiimsan.

Wax ka qabashada isbedelka cimilada weeye sababta aan u go'aansaday in aan siyaasadda ka qey qaato. Minnesota, iyo gobolada kale, waa in kordhinaa dadaalkeena ku aadan la dagaalanka isbedelka cimilada, iyo mararka qaarkood, ka dagaalano sharciyada khaladka ah ee dawladda federaalka ee isbedelka cimilada. Waxaa iga go'an ma aha in aan difaacno guulaha aan gaarnay oo kaliya, laakiin aan ku talaabsano kuwo cusub, innaga oo rajeyneyna hab wada shaqeyn ah, oolagu badbaadiyo mustaqbalka caruurta.

